# Macaashyada Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ee loogu talagalay xubnaha ka yar da'da 21

## Macaashyada Baaritaanada Sahlan ee Hore iyo Muddaysan, Ogaanshaha, iyo Daaweynta (EPSDT): Adeegyada Daryeelka Caafimaadka oo Dhammaystiran

OHP waxay daboolaan daryeelka carruurta iyo dhalinyarada ilaa ay ka gaaraan da'da 21 ee ay u baahan yihiin si ay u caafimaadqabaan una koraan. Tani waxaa ku jira baaritaanada sahlan, hubinnada, baaritaanada buuxa, iyo daryeelka dabagalka ah.

- Adeegyadaan waxaa lagu ogaan karaa, sixi karaan ama gacan ka geysan karaan walaacyada caafimaad goor hore.
- Tani waxay ka caawin kartaa carruurta iyo dhalinyarada inay iska ilaaliyaan jirro, naafonimo ama daryeel caafimaad oo dheeraad ah goor dambe.

Dhammaan adeegyada la daboolo waa u bilaash xubnaha OHP. OHP sidoo kale:

- Waxay gacan ka geystaan qabsashada ballamaha adeegyada la daboolo.
- Waxay dabooshaa safarka lagu aado oo lagaga soo noqdo ballamaha la daboolo, sida:
  - Kharashka raacitaanka ambalaasta, baska, tagsiga, ama gaari kale; ama
  - Gaaska ku baxa masaafada aad safarto adoo isticmaalaya gaarigaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac lambarka telefoonka ee ku yaala CCO-gaaga ama kaarka aqoonsiga (ID) ee Qorshaha, ama halkan ka hel adeegyada gaadiid raacitaanka ee deegaanka.

### Adeegyada la daboolo waxaa ka mid ah:

**Adeeg kasta oo loo baahan yahay si loo helo ama loo daaweeyo jirro, dhaawac, ama isbeddellada kale ee caafimaad.**

**Booqashooyinka fayo-qabka ee ilmaha ama booqashooyinka**

**fayo-qabka ee dhalinyarada. Booqashooyinkaan waxaa ka mid ah:**

- Baaritaan jireed oo buuxa
- Baaritaanada sahlan ee karritaanka
- Baaritaano sahlan oo lagu baaro rasaasta, dhiig-yarida, dhiig-yarida unugyada asaliga ah, ama walaacyada kale
- Hubinta nafaqada
- Tallaalada (irbadaha) la qaato waqtiga lagu taliyay

**Adeegyada caafimaadka ee jirka**

- Daawaynta jirrada ama dhaawaca
- Qalliinka
- Daaweynta jirka
- Qalabka caafimaadka ee waara, sida gure-guraha iyo ulaha/biraha curyaanka

**Adeegyada habdhaqanka caafimaadka**

- Daaweynta caafimaadka maskaxda
- Daaweynta cillada isticmaalka maandooriyaha
- Falanqeynta Habdhaqanka La Dabaqi Karo

**Rijeetooyinka**

- Daawooyinka
- Sahayda caafimaadka
- Daawooyinka nafaqada ah/cuntooyinka caafimaadka

**Adeegyada ilkaha**

- Baaritaanada sahlan iyo nadiifinta ilkaha
- Buuxinta ilkaha, daboolida ilkaha, taajajka ilkaha iyo ilkaha macmalka ah
- Ilko xirashada/toosinta ilkaha marka ay jiraan duruufo xaddidan

**Adeegyada aragga**

- Baaritaanada sahlan
- Ookiyaayaha indhaha ama muraayadaha indhaha
- Daaweynta aragga

**Adeegga hadalka iyo maqalka**

- Baaritaanada sahlan
- Daaweynta hadalka-luuqada-maqalka
- Aaladaha gacanta ka geysan kara maqalka ama hadalka

**Adeegyada kale ee lagu horumarinayo caafimaadka iyo korritaanka**

- Terabiga shaqada
- Adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo dugsiga, sida adeegyada ku jira Barnaamijka Waxbarashada La Gaar Yeelay
- Adeegyada daryeelka ee gaarka ah
- Adeegyada baxnaaninta, sida xirfadaha qodbida kadib dhaawaca

**Laga bilaabo Janaayo 1,2023, OHP ayaa laga yaabaa inay daboolaan qaar ka mid ah adeegyada aan horay loo dabooli jirin.**

- Weydii bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga wax ku saabsan helitaanka adeegyada OHP aysan horay u dabooli jirin.
- Daryeel bixiyuhu wuxuu tixgelin doonaa baahida shakhsiyeed iyo taariikhda caafimaadka.
- Adeegyada qaarkood, daryeel bixiyaha ayaa looga baahan doonaa inuu ka codsado ururka daryeelkaaga isku dubarida (CCO) ama Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) inay ansixiyaan.

## SU'AALO IYO JAWAABO

### Yaa u-qalma macaashyada EPSDT?

Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 21 jir ee haysta macaashyada OHP Plus. Caymiska EPSDT wuxuu dhamaanayaa markay tahay maalinta dhalashada ee 21aad ee xubinta. Markaas kadib, xubinta OHP ka tirsan ayaa laga yaabaa inuu helo caymiska dadka waaweyn.

### Ka waran haddii ay dhibaato iga hayso helitaanka adeegyada?

Xiriirka:

- Qaybta Adeegyada Macmiilka ee OHP (OHP Client Services Unit)
  - Telefoonka: 1-800-273-0557
  - Iimaylka: OHP.ComplaintResolution@odhsoha.oregon.gov
- Barnaamijka Dhexdhexaadiyaha OHA (OHA Ombuds Program)
  - Iimaylka: OHA.OmbudsOffice@odhsoha.oregon.gov
  - Telefoonka: 1-877-642-0450 (waa khadka farriinta oo keliya)

Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa shaqaalaha EPSDT EPSDT.Info@odhsoha.oregon.gov.

**Ka waran haddii OHP aysan daboolin adeegyada loo baahan yahay?**

Haddii OHA ama CCO ay go'aansadaan inay diidaan, dhimaan ama joojiyaan caymiska adeeg kasta oo aad u malaynayso in OHP ay daboosho:

- Waa inay kuu soo diraan ogeysiis qoraal ah ay arrintani kuugu sheegayaan.
- Waad ka codsan kartaa OHA ama CCO-gaaga racfaan ka qaadashada go’aankan. Ogeysiiska qoraalka ah ayaa kuu sheegi doona sidani tani loo sameeyo.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo mareegta OHP.

**OHP.Oregon.gov**

**Dukumintigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaad balaaran, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid.. Kala xiRIIR Adeegga Macmiilka OHP LAMBARKA 800-699-9075 (TTY 711). Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.**